Adeegga Mas'uuliyadda

› Sidee bay kuu caawin karaan?

Federal Public Service
Justice

.be

Marka aad timaado Belgium

Miyaad ka yar tahay 18 jir oo miyaad Belgium timid aabahaaga iyo hooyadaada la'aantooda? Ma waxaad raadineysaa taageero iyo degaan ama boliiska ayaa ku joojiyey,...Haddii ay sidaa tahay, Adeegga Mas'uuliyadda, oo hoos timaada Waaxda Caddaaladda Federaalka, ayaa joogitaankaaga Belgium la la socodsiin doonaa.

Wel welka ugu horeeyo ee Adeegga Mas'uuliyadda ayaa waxay noqon doontaa in la hubiyo in aad hesho meel aad joogto. Haddii aadan haysan meel aad joogto, Adeegga Mas'uuliyadda ayaa hubin doonta in lagu geeyo xarun lagugu xanaaneeyo oo sariir iyo cunto laguugu siiyo.

Haddii aad la nooshahay qoys, saaxiibo, ama xarunta magan-galyo doonka, hubi in aad cinwaankaaga iyo talefoon lambarkaaga aad Adeegga Mas'uuliyadda siiyo. Tani aad bay muhiim u tahay si ay kula soo xiriiraan.

Shuruudaha lagaaga baahan yahay in aad buuxiso

Si aad gargaar uga hesho mas'uul, waa in aad:

- ka yar tahay 18 jir;
- aad Belgium joogto aabahaaga ama hooyadaada la'aantood;
- aad ka timid wadan ka baxsan Deegaanka Dhaqaalaha Reer Yurub[1] (European Economic Area);
- aad dalbatey arjiga magan-galyodoonka ama aad Belgium degan tahay adiga oo aan haysan wax ogolaansho ah.

Si qorshahaaga loo ogaado, Adeegga Mas'uuliyadda waxay ururinaysaa macluumaad badan sida suurto galka ah oo waxaa laga yaabaa in ay weydiiso in ay adiga ku arkaan.
Sidoo kale adiga nasfi ahaantaada ayaa la xiriiri kara.
Haddii aad buuxiso shuruudaha, Adeegga Mas'uuliyadda waxay sida ugu dhaqsaha badan ay kugu qori doontaa mas'uul.

[1] ***Wadamada ku jira Deegaanka Dhaqaalaha Reer Yurub waxaa ka mid ah : Germany, Austria, Belgium, Denmark, Spain, France, Greece, Finland, Ireland, Italy, Luxembourg, the Netherlands, Portugal, the United Kingdom, Sweden, Cyprus, Hungary, Estonia, Poland, the Czech Republic, Slovenia, Latvia, Lithuania, Slovakia, Malta, Romania, Bulgaria, Norway, Iceland, Liechtenstein.***

Waa kuma mas'uulka?

Haddii aad Belgium joogto, mas'uulku waa shaqsi ku caawin doonta ilaa aad ka gaarto 18 jir. Wuxuu halka u jogaa in uu ku gargaaro oo uu ku matalo. Asaga ayaa kaa caawin doonaa haanka maamulka ama sharciga ee Xafiiska Shisheeyaha, dhanka dugsiga, xarumaha degaanka,… Xagga ayuu ku joogi doonaa si uu u dhegeysto su'aalahaaga, dhibaatooyinkaaga iyo wuxuu kaagala hadli doonaa go'aamada ku wanaagsan aad qorshahaaga ku socod siineyso.

Mas'uulka wuxuu kugu xeri doonaa qareen, kaasoo aad u baahan tahay si loo dhameystiro hanaan kasta ee xagga maamulka iyo sharciga. Adeegyada qareenku waa mid bilaash ah.

Adiga oo ku heshiinaya oo ka caawinaya, mas'uulku:

- adiga ayuu ku matali doonaa dhammaan xaaladaha sharciga, gaar ahaan tan la xiriirta qaabka joogitaankaaga Belgium;
- xiriir aaminaad ah ayuu adiga kula dhisi doonaa oo si joogto ah ayuu kuu soo booqan doonaa;
- wuxuu kula raadin doonaa deegaan, wuxuu kugu qorayaa dugsi oo wuxuu hubin doonaa in aad hesho daaweyenta lagama maarmaanka ah iyo caawinaada cilmi-nafsiga la xiriira;

- wuu kula fariisan doonaa si la isku dayo in la helo xal muddo-dheer ah oo mashruucyadaada waafaqsan;
- wuxuu kaa caawin doonaa in aad hesho waalidiintaada.

Waxaad heli doontaa warqad ku qoran magaca iyo faah-faahinta mas'uulkaaga. Mar kastaba gacanta ku hey, maxaa yeeley waad u baahnaan doontaa mar kasta aad dowlada la macaamileyso.

Sidoo kale mas'uulkana wuxuu heli doonaa warqad ku qoran faah-faahintaada. Tani waxay mas'uulku u ogolaaneysaa in sida ugu dhaqsaha badan uu kugula soo xiriiro. Sidoo kale adigana goorta aad jeceshahay ayaad mas'uulkaaga ula xiriiri kartaa.

Fekradaada waa muhiim

Haddii aad ku raacsaneyn mas'uulkaaga, kala hadal!

Sidoo kale Adeegga Mas'uuliyadda waxay xagga u joogaan in ay adiga ku dhegeystaan.

Haddii is-af-garadwaaga la xallin kari waayo, arrimaha waxaa la hor geynayaa gar-soore.

Mas'uuliyadnimada marka ay dhamaato, su'aalo ayaa laguu soo diri doonaa. Tani waxay ayaga u ogolaaneysaa in ay helaan fekradaada aad ka qabto gargaarka lagu siyey.

Goorme ayay ku eg tahay mas'uuliyadnimada?

Mas'uuliyadnimada waxay joogsataa markii ay xaaladahaan dhacaan:

- aabahaaga ama hooyadaada ay Belgium joogaan;
- aad gaarto 18 jir;
- aad Belgium ka tagto;
- aad qaadato dhalashada Belgium'ka;
- aad hesho ogolaanshaha degnaansha joogtada ah (open-ended residence permit).

Talo wax-ku-ool ah

Ha ka-shakin in aad la xiriirto mas'uulkaaga ama Adeegga

Mas'uuliyadda: waxay halkaas u joogaan in ay ku caawiyaan.

Xusuuso in aad haysato kaarka yar ee la socda oo ku qoran faahfaahinta adeega iyo kan mas'uulkaaga. Tani waa mid muhiim ah, maxaa yeeley dowladu ayaa u baahnaan doonta si ay mas'uulkaaga ula xiriiraan.

Dhowr ballantaada aad la leedahay Adeegga Mas'uuliyadda, mas'uulkaaga iyo dowladaba.

Haddii aad guurto ama talefoonka aad badesho, sii mas'uulkaaga cinwaankaaga cusub ee lagaala soo xiirayo.

Contact

Guardianship Service

115 boulevard de Waterloo
1000 Brussels
Telephone: 078 15 43 24
Fax: 02 542 70 83

Your gardian

Name and first name .....
Address .....
.....
Phone number / Mobile phone .....
E-mail .....
Fax .....

RESPONSIBLE EDITOR : A. BOURLET BD DE WATERLOO 115 - 1000 BRUSSELS D/2010/7951/SO/758

Communication and Documentation Service
Boulevard de Waterloo 115
1000 Brussels
Tél. : 02 542 65 11
www.just.fgov.be